Ma waxaad tahay heshiis ku shaqeeye amase mid shaqo marmar qabta

Waan ku hadalnaa afkaaga ☎ 13 1202

Are you a contract or casual worker? - **Somali**

Haddii aad ku dalbatay lacagta taageerada dakhliga ee soo socda midkood, waxaa laga yaabaa inaad muddo sugto ka hor inta aadan lacagta hellin.

- Newstart Allowance
- Youth Allowance
- Austudy
- Sickness Allowance
- Carer Payment
- Special Benefit (dadka wata fiisada magacaaban oo keliya)
- Disability Support Pension (marka laga saaro macmiilayaasha gebi ahaanba indhaha la')
- Parenting Payment, **ama**
- Widow Allowance

Haddii adiga ama ninkaagu aad samayseen shaqo marmar ah lixdii bilood oo ugu dambaysay, waxaa laga yaabaa inaad sugtaan muddo sugitaan inta aydin lacagta qaadan. Mudada sugitaanku waxay khusaysaa shaqaale xilliyeedka ilaa 1999, iyo laga soo bilaabo 20ka Sebteembar 2006, waxay kaloo khusaysaa shaqaalaha heshiiska iyo kuwa ku shaqeeya waqtiga dhiman.

Waa maxay shaqaalaha heshiis ama kuwa marmarka ahi?

Shaqada caqdigu waa shaqo kasta oo lagu qabto heshiis muddo go'an iyo/ama kuwaas oo ay ku jirto caqdi hoosaad.

Shaqo marmar ah (shaqo marmar ah) waa shaqo waqtiwaqti la hello, lana malayn karo inay dhamaato ama aan muddo la hellin, waxayna ka yar tahay sanad mana laha fasax.

Shaqada caqdiga iyo tan marmarka ah waxaa ku jiri kara:

- Shaqo ay saamaysay xiritaan joogto ah sida shaqada warshadaha oo si ku meel gaara loo xiro mudada kirasmaska ama dayactir.
- Shaqo kasta oo bilaabata hadana u istaagta si joogto ah sida macdanta iyo shaqooyinka saliida
- Shaqo aan joogto u socon ama shaqo muddada aan la shaqaynayn la saadaalin karo
- Shaqo qof la nasinayo sida shaqada wax barrida ama shaqada caafimaadka
- Shaqo la talin ah
- Shaqo caqdi oo ay ku jirto mid caqdi kale lagu sii bixiyey
- Shaqaalaha caafimaadka iyo daaweynta, **iyo**
- Shaqada caqdiga ee fanka iyo hay'adaha maaweelinta.

Waqtiga sugitaanku ma ku khuseeyaa adiga?

Waqtiga sugitaanku **kuma** khuseeyo adiga haddii:

- Shaqada aad haysaa ay qaadatay in ka badan hal sano, **ama**
- Waxay xaq u yeellatay fasax markaad ka shaqaynaysay shaqada caqdiga la gelayo ama mida marmarka ah.

Waqtiga sugitaanku waa ku khuseeyaa haddii:

- Shaqadaad qabanaysay ay la mid tahay midda caqdiga ama midda marmarka ah, **iyo**
- Haddii waxa ku soo galay ka badan yihiin waxa qofka caadiga ah soo gala asbuucii*.

Centrelink ayaa xisaabin doonta intaad sugi doonto ka hor intaadan hellin lacagta haddii waqtiga sugitaanku ku khuseeyo adiga.

Waxaa jira dad aanay khusayn waqtiga sugitaanku, midaasna waxaa lagaga hadli doonaa waraysiga.

* Lacagta caadiga ah ee celcelis ahaan Asbuucii qofka soo gashaa waa qiyaasta Hay'ada Tirakoobka ee Austrarlia taas oo ay hellaan dadka caadiga ah ee reer Australia intay asbuucii shaqeeyaan. Lacagtaas laga hadlayaa waa qiyaas la xereeyey 2006 waxayna dhan tahay $1022.60 asbuucii qofka kelidiis ah iyo $2045.20 dadka isqaba. Lacagtaas waxbaa laga bedelaa sanad walba. Tusaalayaasha soo socdaa ayaa kuu sheegaya sida loo xisaabiyo.

Waa immisa waqtiga sugitaanku?

Tani waxay ku xiran tahay inta kaa soo gashay shaqada, iyo intaad shaqaynaysay.

Haddii waxa ku soo galaa uu ka sareeyo inta caadiga ah waxaa laga yaabaa inaad sugto waqti ka hor inta aadan hellin lacag.

Tusaalayaasha soo socda ayaa kuu sheegaya mudada sugitaanka sida loo xisaabiyo.

Tusaalaha 1aad

Rachel waxay ka shaqaysay Hotel siddeed asbuuc. Shaqadii way ka dhamaatay waxayna dalbatay Newstart Allowance. Lacagta mudadaas soo gashay waa $12 288.

Rachel waqtigeeda sugitaanku sida soo socota ayuu u shaqeeyaa:

Talaabada 1aad: lacagta guud waa lacagta caadiga ee asbuucii la helli karo (1022.60) oo loo qaybiyey lacagta la hellay waxayna noqonaysaa
$12 288: $1022.60= 12.01 asbuuc.
(Rachel waxay shaqaysay 12.01 asbuuc oo ah shaqo caadi ah)

Talaabada 2aad: 12.01 asbuuc-siddeedii asbuuc ee rachel shaqaysay waxay noqonaysaa 4.01 asbuuc

Cadadkaasi waxaa loo soo gaabinaya lambarka ugu dhow oo dhan, marka Rachel asbuucyadeedu waa: 4 asbuuc.

Sidaas darteed Rachel waa inay sugtaa 4 asbuuc marka laga soo bilaabo waqtigii ay shaqada bilawday ka hor intaan la siin Newstart Allowance.

Tusaalaha 2aad

Darren xaas ayuu leeyahay wuxuuna ka shaqeeyey goob dhismood 16 asbuuc. Wax shaqo ah oo uu hadda hayaana ma jirto wuxuuna dalbaday Newstart Allowance. Lacagta soo gashay waxay dhamayd $34 234. Darren xaaskiisu waxay qabataa shaqo marmar ah oo xisaabiye ah. Lacagta soo gashayna 16kii asbuuc oo ugu dambeeyey oo Darren ka shaqaynayey dhismaha waa $9376. Markii Darren shaqadiisii dhamaatay waxay dalbadeen Newstart Allowance.

Mudada sugitaanka sidan ayey noqonaysaa:

Talaabada 1aad: labadooda lacagtooda oo la isku daray waa $34 234+$9376= $43 610

Talaabada 2aad: lacagta labadaba qof ayaa loo qaybinayaa lacagta caadiga ah oo labada isqabta oo ah $2045.20.
waxayna noqonaysaa
$43 610 loo qaybiyey $2045.20=
21.32 asbuuc

Talaabada 3aad: 21.32 asbuuc – 16 asbuuc Darren uu shaqeeyey = waa 5.32 asbuuc

Cadadkaan waxaa lagu soo yaraynayaa lambarka ugu yar oo ah 5 asbuuc.

Darren iyo Julie waxay u baahan doonaan inay sugaan shan asbuuc laga soo bilaabo markii Darren shaqada joojiyey intaan loo bilaabin Newstart allowance.

Tusaalaha 3aad

Brian waa kelidiis wuxuu ku shaqeyey nasiyaha kalkaalisada caafimaadka 26 asbuuc. Wuxuu shaqadii dhameeyey lix asbuuc ka hor, wuxuuna go'aansaday inuu fasax u baxo inta aanu shaqo raadsan hadana wuxuu rabaa inuu dalbado Newstart Allowance. Lacagta isku darka oo uu qaatay waa $30 585.

Mudadiisa sugitaanka sidan ayey noqonaysaa:

Talaabada 1aad: tirada guud oo shaqada oo loo qaybiyey lacagta caadiga ah ee la qaato ($1022.60) waa
$30 585 loo qaybiyey
$1022.60=29.90 asbuuc

Talaabada 2aad: 29.90 asbuuc – 26da asbuuc oo Brian shaqeeyey waa 3.9 asbuuc

Cadadkaan waxaa loo soo yaraynayaa lambarka ugu dhow: waana 3 asbuuc

Saddexdaan asbuuc waxay ka soo bilaabanaysaa markii ugu dambeeyey oo Brian shaqeeyey. Brian **maaha** inuu sugo inta laga siinayo Newstart Allowance sababtoo ah lix asbuuc ayaa ka soo wareegatay markii ugu dambeeyey oo uu shaqeeyey.

Maxaad u baahan tahay inaad u geyso Centrelink?

Haddii adiga ama xaaskaagu dhamayseen shaqadii caqdiga ahayd ama shaqadii marmarka ahayd lix bilood ka hor intaadan lacag weydiisan, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka Centrelink si aad u siiso faahfaahinta soo socota:

- Shaqda aad adiga ama xaaskaagu qabateen iyo cidaad u qabateen
- Markaad bilawdeen iyo markaad dhamayseen
- Lacagta guud oo aad qaadanayseen mudadaas, **iyo**
- Faahfaahinta wax kasta oo lagaa gooyey (sida uu ogol yahay xafiiska Cashuuraha ee Australia).

Waxaad kaloo u baahan doontaa inaad keento wax cadaynaya macluumaadka sida warqada lacag bixinta, buugga qaansheegadka, shahaadada wadarta lacagta aad qaadatey oo dhan, qoraalka faa'iido iyo qasaaraha ee xisaabiyuhu diyaariyo, cadaynta bangiga, warqada waqtiga lacagta ama warqad ka socota cidda aad u shaqayso.

Haddaadan hubin in habkaani ku saamaynayo ama aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan, la xiriir Centrelink. Haddaad la kulanto dhibaato dhaqaale intaad ku jirto xilliga sugitaanka, ama aad u baahan tahay caawimo, la hadal Centrelink.

Haddii aad tahay qof dad u shaqeeyo lagana yaabo inay saamaysay, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad Centrelink u keento macluumaadka ku saabsan shaqadooda. Fadlan la xiriir Khadka Ganacsiga ee Centrelink oo ah **13 1158** haddii aad su'aalla qabto.

Afeef

Macluumaadka qoraalkaan ku jira waxaa loogu talagalay oo keliye tuse lacag bixineed.

Waa maxay masuuliyaadkaagu?

- Waa masuuliyadaada inaad go'aan ka gaarto haddii aad doonayso inaad dalbato lacagta aadna samayso dalabka, adoo tixgelinaya xaalladaada gaar ahaaneed.
- Macluumaadku sax ayuu ahaa Sebteembar 2006, waase laga yaabaa in wax iska bedelaan.

Ilaa goormaa lacagta la bixin karaa?

Lacagaha Dawladu bixiso badankood waxaa la bixiyaa laga soo bilaabo, ama ka dib, taariikhda dalabka la sameeyo. Sidaas darteed horay markaad u sii xerayso foomkaba horay ayaad lacagtaada u hellaysaa.

Maxaa dhacaya haddaad qof saddexaad la xiriirayso?

Waa laga yaabaa inaad la xiriirto qof saddexaad kaas oo aan ahayn shaqaalaha Centrelink. Haddii aad sidaas samayso, fadlan xasuuso in Centrelink aanay ansixin in qolla saddexaad ku siiso macluumaad ama talo adiga taas oo ku saabsan lacagbixintaada.

Si aad ugula hadasho Centrelink afkaaga wac **13 1202***.
Macluumaad afkaaga ku qoran ayaa laga helli karaa **www.centrelink.gov.au**

* Telefoonada ka kaca 13 waxaa laga soo diri karaa meel kasta oo Australia ku taal qiima aan ka badnayn meeshaad joogto (qiimuhu wuxuu ku xiran yahay kuwa adeega telefoonka bixiya. Telefoonada ka kaca 1800 waa lacag la'aan. Telefoonada laga soo diro moobaylada iyo wadada qiimohoodu aad ayuu u sareeyaa.